# ILAALINTA

(Qaybta 7 ee Xeerka Caafimaadka Maskaxda 1983)

| | |
|---|---|
| 1. Magaca bukaanka | |
| 2. Magaca Ilaaliyahaaga<br>2.1 Magaca | |
| 2.2 Cinwaanka | |
| 2.3 Lambarka Telefoonka | |
| 3. Xukumada adeegga bulshada deegaankaaga | |

## Waa maxay Ilaalinta?

Sida u qabo qaybta 7 ee Xeerka Caafimaadka Maskaxda 1983, dadka qaba jirro maskax waxaa la siin karaa ilaaliye caawiya, haddii ay labo takhtar sheegaan inuu u baahan yahay.

Ilaaliyahaada wuxuu ahaan karaa xukumada adeegga bulshada deegaankaaga, ama qof ogolaadey xukumada adeegga bulshada. Haddii Ilaaliyahaada uusan ahayn xukumad adeeg bulsho, waxaa lagu magacaaba “ilaaliye khaas ah”.

Ilaaliyahaada wuxuu qabaa awood sharciyeed inuu:

- ku sheego meesha aad ku noolan doonto
- kuu diro ballamada sidii laguu daaweeyo, shaqo, waxbarasho ama tababar meel iyo waqtiyo degsan laga qabanaayo
- inuu awood siyo takhtarka ama qof kale ee la magacaabey inay ku arkaan.

## Waa maxay sababta aan u baahan ahay ilaaliye?

Laba takhtar ayaa u maleeyo inaad caawinaad ugu baahan tahay ku nololka jaaliyadda inkastoo aad qabtid jirro maskaxeed iyo u baahan tahay ilaaliye ee ilaaliyo dantaada ama badbaadiyo dad kale.

## Ilaa gormee ayuu socon doonaa?

Ilaalintata wuxuu goortaa koowaad socon doonaa ilaa lix bilood.

Ilaalintaada waxaa la cusboonaysiin karaa lix bilood ee kale, kadibna sanad walba waqtigiiba, haddii takhtarka mas'uul kaa ah  ama takhtarka lagugu magacaabey u maleeyaan inuu muhiim yahay. Markii waqtiga loo dhoowaado way kaala hadli donaan.

Takhtarka mas'uul kaa ah waa takhtarka, ama qof kale, ee xukumada adeegga bulshada deegaanka ka codsadey inay sheegaan haddii aad weli u baahan tahay ilaaliye. Haddii aad qabtid ilaaliye shakhsiyadeed, kani waxaa samayn doono takhtar lagu magacaabo "takhtarka  kugu magacaaban".

## Miyaan rafcaan soo codsan karaa?

Haddii aad rabtid inaad joojiso Ilaalintata, waa inaad la hadasha  xannaaneyahaaga, takhtarka mas'uul kaa ah ama takhtarka lugugu magacaabey.

Waxaad xittaa uu soo qori kartaa xukumada adeegga bulshada sidii aad uga codsato inay joojiyaan Ilaalintata. Qof ka socdo xukumada adeegga bulshada ayaa rabi doono inuu kula hadlo ka hor intii uu go'aan ka gaarin haddii aad weli u baahan tahay  ilaaliye iyo inkale.

Qoyskaaga soke wuxuu joojin karaa Ilaalintata markii uu warqad u soo qoro xukumada adeegga bulshada. Buug-yarahaan wuxuu hoos kugu macnaynayaa qofka lagu magacaabey inuu ahaado qoyskaaga soke.

Waxaad xittaa Maxkamadda ka codsan kartaa inay soo sheegaan inaadan dib ugu bahnayn Ilaalinta.

## Waa maxay Maxkamadda iyo maxaa dhici doono?

Maxkamadda waa guddi madaxbanaanan oo go'aamin karo haddii aad ilaaliye weli u baahan tahay iyo inkale. Wuxuu kullan la sameyn doonaa adiga iyo shaqaalaha ku yaqaano. Kullanka waxaa lagu magacaabaa "dhegaysi". Waxaad qof kale  ka codsan kartaa inay dhegaysiga kuu soo raacaan sidii ay kuu caawiyaan, haddii aad doonayso. Dhegaysiga ka hor, xubinada Maxkamadda ayaa akhrin doono warbixinta laga qorey adiga iyo ilaaliyahaada. Hal ka mid ah xubinada Maxkamadda ayaa xittaa imaan doono sidii uu kuula hadlo.

## Gormee ayaan maxkamadda codsi ka samaysan karaa?

Waxaad codsi ka samaysan kartaa Maxkamadda hal mar lixda bilood ee ugu horreeya ee lagu xannaaneeyo. Waxaad markaa ka dib codsi labaad sameysan kartaa lixda bilood ee xiga, markaas kadibna hal mar sanad walba ee lagu xannaaneeyo.

Haddii aad rabtid inaad codsi ka sameyso Maxkamadda waxaad u soo qori kartaa:

The Tribunals Service
PO BOX 8793
5th Floor
Leicester
LE1 8BN Tel. 0845 2232022

Waxaad qareen ka codsan kartaa inuu Maxkamadda uu warqad wakiil ahaan adiga kuu soo diro iyo inuu kugu caawiyo dhegaysiga. Xukumada adeeggaaga bulshada iyo Ururka Sharciga waxay qabaan liis ku qoran qareenada kani ku takhasuusan. Looma baahno inaad qareenka lacagtiisa bixiso. Waa bilaash markii la raaco nidaamka ku Caawinta Sharciga.

## Ogeysiinta qooyskaaga soke

Nuqulka buug-yarahaan waxaa la siin doonaa qofka uu Xeerka Caafimaadka Maskaxda u ku aqoonsado inuu yahay qooyskaaga soke.

Waxaa jiro liis ku qoran dad uu Xeerka Caafimaadka Maskaxda ula dhaqmo inay yihiin qoyskaaga. Caadi ahaan, qofka ugu sareeya liiskaas ayaa lagu magacaabi doonaa inuu noqdo qoyskaaga soke. Xukumada adeeggaaga bulshada ayaa ku siin karo buug-yare oo kani kuu macneynaayo iyo xuquuqyada qoyskaaga soke leeyahay markii xiriir lala yeesho xannaadaada iyo daaweyntaada.

Xaaladdaada markii la fiiriyo, waxaa noola sheegay in qoyskaaga soke uu yahay:

| |
|---|
| |

Haddii aadan rabin inaad hesho nuqulka buug-yarahaan, fadlan u sheeg takhtarka mas'uul kaa ah, shaqaalaha bulshada ama qofka ku siiyey buug-yarahaan.

Haddii aadan u malayn in qofkaan u ku habboon yahay inuu ahaado qoyskaaga soke, waxaad codsi ka samayn kartaa Maxkamadda Degmada in qof kale ku magaacabo qoyskaaga soke. Xukumada adeegga bulshada deegaankaaga ayaa ku siin karo buug-yare kani kuu sharraxaayo.

## Shuruud Dabakhaad

Waxaa jiro Shuruud Dabakhaad oo shaqaalaha isbitaalka ee ku xannaaneeyo ku talinaayo Xeerka Caafimaadka Maskaxda. Waa in shaqaalaha tixgeliyaan waxa ay Shuruudda sheegaayso markii ay go'aan ka gaarayaan xannaanadaada. Waxaad weydiin kartaa inaad aragto nuqulka Shuruudda, haddii aad doonayso.

## Sidii aad u hesho caawinaad iyo macluumaad dheeraad ah

Haddii uu jiro wax aadan ka garan xannaanadaada iyo daaweyntaada, xannaaneyahaaga ama xubin ka mid ah shaqaalaha ayaa isku dayi doono inay ku caawiyaan. Fadlan ka codso xubin ka mid ah shaqaalaha inuu kuu sharraxo haddii uu jiro wax aadan ka garanin buug-yarahaan ama haddii aad qabtid su'aalo oo buug-yarahaan ka jawaabin.

Fadlan weydii haddii aad qof kale u rabto  nuqul kale ee buugyarahaan.